**Sharci L. 31 ee 10 Maarso 1973**
**Aasaasida Hay'adda Qaran ee Warshadda Hilibka**

**Guddoomiyaha**
**Golaha Sare ee Kacaanka**

Markuu tixgeliyey ansaxidda Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayeyaasha.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda;

**Qod.1**
**Aasaasid**

1. "Warshadda Hilibka ee Kismaayo" ayaa la aasaasay oo ah Hay'ad leh xuquuq Guud, leh shaqsiyaad Qaanuuni laguna magacaabo Hay'adda Qaranka ee Warshadda Hilibka.
2. Hay'adda waxay xarun ku leedahay Kismaayo iyo meeshii kale la noqoto in ay ku yeelan karto xafiisyo matala iyo wakaalado, meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda ama Dibedda.
3. Warshadda waxaa lagu dhaqaa xeerkan iyo xeer-hoosaadka u degsan Hay'adaha leh xuquuq Guud.

**Qod. 2**
**Kormeerka**

1. Warshadda waxay hoos tageysaa kormeerka Xoghayaha Dowladda ee Warshadda.
2. Xoghayaha Dowladda ee warshadda, markay la noqoto lagama maarmaan iyo maslaxadda Qaranka, wuxuu awoodaa had iyo jeer inuu bixiyo tilmaamo lagama maarmaan u ah Hay'adda, si waafaqsan sharcigan iyo xeerhoosaadyada Guud ee Hay'adaha leh xuquuq Guud ama xeerar kale.

**Qod. 3**
**Ujeedooyinka**

Hay'addu waxay ka shaqaynaysaa ujeedooyinka soo socda;

a) Gacan ka geysashada horumarinta Warshadda hilibka iyo badeecada wax soo saarka hilibka.
b) Maamulidda xagga ka shaqeynta iyo ka ganacsiga hilibka, haraga iyo badeecada la kale;
c) Maamulidda xagga ka shaqeynta iyo ka ganacsiga wax soo saar kasta ee la xiriirta warshadda.

**Qod. 4**
**Awoodaha**

Waxaa la siiyey Hay'adda inta ku siman sharcigan dhammaan awoodaha iyo fursadaha lagama maarmaan u ah socodsiinta waxqabadka iyo dabagalka ujeedooyinkiisa sharciyeed.

## QAABDHISMEEDKA

### Qod. 5
### Agaasimaha Guud iyo Maamulaha Waaxda

1. Hay'adda "Warshadda" waxaa maamula Agaasimaha Guud, kaasoo lagu magacaabay Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Warshadadaha,
2. Warshadda waxay u qaybsantahay Waaxyo qaybo, shaqooyin iyo qaybo socodsiiya maamuleyaalayaal waaxyo, guddoomiyaal shaqo iyo guddoomiye qaybeed.
3. Maamuleyaasha Waaxaha, waxaa lagu magacaabaa Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka kaddib soo jeedinta xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.

### Qod. 6
### Waxqabadka Agaasimaha Guud.

1. Agaasimaha Guud waa wakiil sharciga isla markiina ah xubinta fulinta Hay'adda, wuxuuna ku qabanaa shaqooyinka soo socda;
   a) Wuxuu heshiis u gala danta warshadda;
   b) Wuxuu mas'uul ka yahay maamulka iyo socodsiinta warshadda, wuxuuna qaadi karaa tallaabooyin maamul iyo mid asluubeed oo ku saabsan shaqaalaha wakaaladda, inta ku siman awooddiisa, sida waafaqsan sharciga 22 Abriil 1972, L.36 iyo Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka 22 Abriil 1972 L.74 oo la xiriira Xeerka Shaqaalaha ee Hay'adaha leh xuquuq Guud;
   c) Wuxuu mas'uul ka yahay dhowrista habxisaabeedka .
   d) Socodsiinta howlaha kala duwan, wuxuuna diyaariyaa habsami u socodkooda.
2. Haddii si ku meel gaar ah hawsha u xanibanto ama u maqanaado Agaasimaha Guud shaqadiisa waxaa qabanaaya sarkaal uu magacaabay xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.

### Qod. 7
### Xaaladda Sharciyeed iyo dhaqaaleed ee shaqaalaha Warshadda

Gunnoyinka Agaasiamaha Guud iyo xaaladda sharciyeed iyo dhaqaaleed ee shaqaalaha Warshadda waxaa Xeeraayay Sharciga 22 Abriil 1972, L.36 iyo Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka 22 Abriil 1972, L. 74 iyo Isbedel kasta iyaga lagu sameeyo.

### Qod. 8
### Shaqaalaha Warshadda

1. Shaqaalaha warshadda waxuu ka koobanyahay shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa ku meel gaarka ah oo warshadda si toos ah u qoratay iyo shaqaale Dowladeed oo ka baxsan iyada.
2. Xubnaha shaqaalaha wakaaladda waxaa lagu maamula Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka kaddib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee warshadaha.
3. Shaqaalaha ee warshaddu u baahantahay waxaa loo qaataa si waafaqsan Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee Abriil 1972, L.74, oo la xiriira Nidaamka Shaqaalaha Hay'adaha Danta Guud iyo Isbedel kasta ee ku yimaada ama nidaam guud ee u degsan Hay'adaha leh xuquuq Guud.

**Qod. 9**
**Waajibaadka iyo Mas'uuliyadda**

1. Xaaladda sharciyeed, waajibaadka iyo mas'uuliyadda shaqaalaha Dowladda ee u gaarka ah warshadda waxaa lagu maamula sharciga 1da Abriil 1970, L.29 iyo isbedelkii ka dambeeyey ee la xiriira Nidaamka Shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda.
2. Xaaladda Sharciyeed, waajibaadka iyo Mas'uuliydda Shaqaalaha Hay'adda "Warshadda" waxaa lagu maamula sharciga 22 Abrii 1972, L. 36 iyo Xeerka shaqaalaha Hay'adaha leh xuquuq Guud oo lagu soo saaray Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 22 Abriil 1972, L. 74 iyo wixii isbedel ah ee ka dambeeyey.

**Qod. 10**
**Ka Qaadis Xil**

Agaasimaha Guud iyo Agaasimayaasha Qaybaha waxaa xilka looga qaadaa isla habkii hore ee magacaabiddooda.

**Qod. 11**
**Hantida**

1. Hantida warshadda waxay ka koobantahay;
   a) Hantida guurtada iyo maguurtada iyo xuquuq kasta ay leedahay Warshadda Hilibka ee Kismaayo ee jiraty taariikhda dhaqangalka sharcigan;
   b) Waxyaabihii kaloo ka soo galo dhanka dowladda, Hay'ado Guud, Ururo Caalami ama kuwo gaar ah;
   c) Iyo wixii kaloo hore loogu sii wadi karo.
   d) Ka soo jeedda lacag kayd ah ee ka kooban; dhigaalka saamiyada ee adeegyada waxtarka leh, inta ku siman sharciga hay'adaha leh xuquuq Guud iyo kuwa ku yimado isbedel waqtiga soo socda;
   e) Iyo dakhliyo kale ee marmar la helo.

**Qod. 12**
**Miisaaniyadda Sannadlaha**

1. Dhaqdhaqaaqa maaliyadeed wuxuu bilowda kowda Jannaayo kuna eg yahay 31da Disember ee sannad kasta.
2. 30 ka Setember ee sannad kasta, Agaasimaha Guud ee warshadda wuxuu diyaariyaa miisaaniyad hordhac ah ee waxqabka dhaqaale ee xiga, isagoo tilmaamaya aragti ahaan dakhliga soo galaya iyo kharajka baxaya, wuxuuna hordhigaa xoghayaha Dowladda ee Warshadaha si uu u ansixiyo.
3. 31da Setember gudaheeda ee sannad walba, Agaasimaha Guud wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda ku baxayso iyo xisaabta faa'iido iyo khasaare, una gudbiyaa Xoghayaha Dowladda ee Warshadaha iyo Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda.
4. Xoghayaha Dowladda ee Warshadda markuu dhageysto xoghayaha Dowladda ee Maaliyada, wuxuu ansaxinayaa kharajka miisaaniyadda, wuxuuna amri karaa in lagu baafiyo Faafinta Rasmiga, kharajkana Warshadda bixineyso.

**Qod. 13**

**Hab- Xisaabeedka**

Hab-xisaabeedka Warshadda waxaa lagu maamula laguna socodsiiyahabka u degsan ee qodobbada guud ee maamula hab-xisaabeedka ku xusan sharci 31 Luulyo 1972, L. 58 la xiriira maamulka Maaliyadeed, ee Hay'adaha leh Xuquuq Guud iyo wixii isbedel ah ee ka dambeeya iyo qodobbada guud ee Hay'adaha Danta Guud.

**Qod. 14**

**Barnaamijka Sannadlaha**

30ka September gudaheeda ee sannad walba, Warshadda waxay diyaarineysaa warbixin la xiriira barnaamijka guud ee sannadka soo socda, iyadoo tilmaamaysa kharajka suurtagalka ah iyo tabaha dhaqaale ee looga hortagi karo, waxayna horgeyneysaa, si loo ansaxiyo, xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.

**Qod. 15**

**Ammaahyo**

Warshaddu waxay awooddaa, iyadoo ka haysato oggolaasho xoghayaha Dowladda ee Warshadaha, in ay la gasho heshiis ammaah hay'ado deyn bixyeyaal iyo bankiyo gudaha iyo dibedda.

**Qod. 16**

**Dib u eegid xisaabaadka**

Hab-xisaabeedka Warshadda waxaa dabaggala, dibna u eega waaxda u qaabilsan xafiiska xisaabiyaha Guud.

Xoghayaha Dowladda ee Warshadahu wuxuu sameyn karaa waqti kasta kormeer iyo baaris maamul xisaabeedka iyadoo wax loo dhimeynin nuxurka qodobka kor ku xusan.

**XEERAR KAMA DAMBEYS AH**

**Qod. 17**

**Xeer-hoosaad**

Xeer-hoosaadka lagu fulinaayo sharcigaan waxaa lagu soo saari karaa Dekereeto uu soo saaro Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib soo jeedinta xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.

**Qod. 18**

**Guddiga maaraynta**

Agaasimaha Guud ee warshadaha waxaa gacan ku siinaya Guddiga maaraynta si waafaqsan iyo sida habka u degsan sharciga 22 Abriil 1972, L. 36 iyo Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 22 Abriil 1972, L.74.